Ku waalidiinta/masuuliyiinta
carruurta aada fasallada 4. – 10.

Tixraacayaga.:
2019/2879

Tixraaciina.:

Goob: Bergen
21.01.2021

Casuumad ku socota ardayda iskuulka oo ku saabsan ka qaybgalka daraasad-su'aaleed ku saabsan cayda, saaxiibnimada iyo qanacsanaanta gu'ga 2021

Tani waa warqad macluumaad ah oo ku socota waalidiinta/masuuliyiinta oo ku saabsan in dhammaan ardayda dhigata fasallada 4-aad ilaa 10-aad lagu casuumay ka qaybgalka daraasad-su'aaleed ku saabsan cayda, saaxiibtinimada iyo qanacsanaanta ka jirta iskuulka.

Warqaddan macluumaadka ah waa mid ka balaadhan warqadii hore. Waxa sababtu tahay xeerka macluumaadka shakhsiyeed ee cusub ee dhaqangalay 20-kii Luulyo 2018. Xeerkaasi waxa uu ka dhiganyahay in Noorway ku ogolaatay xeerka ilaalinta macluumaadka shakhsiyeed ee Midowga Yurub, General Data Protection Regulation (GDPR).

Ujeedo
Daraasadan waxay qayb ka tahay hawlaha iskuulka ee lagu abuurayo bey'ad iskuul oo sugan oo wacan oo arday kasta helo marka uu joogo iskuulka oo waafaqsan xeerka wax-barida juska 9A. Daraasadu waxa ay iskuulka siinaysaa macluumaad qiimo badan oo ku saabsan sida ay ardaydu u qanacsanaan iyo ammaan ugu haysato iskuulka. Isla markaana waxay wax ka sheegi doontaa ilaa heerka uu iskuulku ku guulaystay hawlihii lagu joojinayey cayda. Xogta la soo helo waxa iyana loo isticmaali doonaa daraasada cilmiyeed ee ku saabsan cayitaanka iyo bey'adda iskuulka, iyo in lagu sii horumariyo hawlaha ka mid ah barmaamijka Olweus (Olweusprogrammet).

Yaa ka masuul ah daraasadda?
Daraasadda waxa ka masuul ah Norwegian Research Centre AS (NORCE) oo ka mid ah kuwa ugu weyn maxadyada daraasadaha cilmiyeed ee madaxabannaan ee Noorway. Daraasadda waxa la hoos geeyey qaybta caafimaadka ee shirkadda, NORCE Helse, waxaana fulinta daraasadda ka masuul ah Xarun-cilmiyeedka goboleedka ee carruurta iyo dhallinyarada (RKBU Vest).

RKBU Vest waxay samaysaa daraasado cilmiyeed, wax-barid iyo sii gudbinta cilmiga horumarinta caafimaadka nafsadeed ee carruurta iyo dhallinyarada. Iskuulku waa meel muhiim ah, waana meelaha ay xaruntu kala shaqayso ka hortagga, iftiiminta iyo maaraynta caayitaanka iyo xadgudubyada dhexmara carruurta iyo dhallinyarada.

Waa maxay sababta ilmaha loo weydiinayo ka qaybgalka?
Iskuullada hirgeliyey *barmaamijka Olweus ee ka hortagga caayitaanka iyo habdhaqanka ka soo*

horjeeda wadadhaqanka ayaa sannad kasta fursad u hela fulinta daraasad-su'aaleed ku saabsan ardayda. Waxa ay arrintani khusaysaa arday dhigta qiyaastii 90 dugsi hoose/dhexe oo ku yaala waddankoo dhan.

Ujeedada barmaamijka Olweus waxa ay tahay in la yareeyo cayda hadda dhexmarta ardayda iyo in isla markaana laga hortaggo wixii cay ah ee iman kara mustaqbalka. Hawlaha ka hortagga cayda ka jirta iskuulku waxay u baahantahay dedaal nidaamsan oo wakhti dheer soconaya. Qayb muhiim ah oo ka mid ah hawshaas ayaa ah in lala socdo sida wax isaga beddeleen iskuulka iyadoo la samaynayo daraasaddo sannadle ah oo ay ardaydu ka jawaabi doonto.

Ka qaybgalka ilmahaagu muxuu ka koobanyahay?
Daraasad-su'aaleedka waxa la samaynayaa saacadaha ay ardaydu joogto iskuulka. Ardaydu waxay isticmaali doonaan kombuutar ama ii-baad marka ay ka jawaabayaan su'aalaha. Wakhtiga ardaydu ay kaga jawaabayso su'aalaha waxay ku xidhantahay da'da iyo heerka wax akhrinta ee ardayga, laakiin waxay ka jawaabista su'aalaha foomka o dhan ay ardayda ku qaadan doontaa 20 ilaa 40 daqiiqo.

Ilmahaagu *ma* sheegi doono magaciisa ama macluumaad shakhsiyeed oo si toos ah loogu garan karo marka uu ka jawaabayo su'aalaha. Marka uu gelayo su'aalaha waxa ilmahaaga laga codsan doonaa keliya inuu sheego jinsiga, fasalka iyo magaca iskuulka.

Ardayda waxa tilmaamo siinaya macalinka ka hor intaanay bilaabin ka jawaabista su'aalaha. Foomka waxa ku jira su'aalo ku saabsan ku qanacsanaanta iskkulka ee ardayga, tirada saaxiibada ee ardaygu ku leeyahay fasalka iyo inta jeer ee ay dhacday in ardaydu is caayeen. Waa su'aalo ku saabsan noocyada kala duwan ee caayitaanka ah tusaale ahaan isticmaalka ereyada iyo naanaysyada xun-xun, in cid loo diido kaqaybgalka ciyaarta ama hawlaha kale, faafinta beenta, laadka, riixitaanka, garaacista iyo burburinta waxyaalaha qof kale leeyahay. Isla markaana waxa daraasaddu isku dayeysaa inay iftiimiso meelaha ka tirsan iskuulka ee ay falalka xun ka dhacaan iyo in ardaydu ay dhacdooyinka u sheegtay tusaale ahaan waalidiinta, macalimiinta, walaalaha iyo axsaabta. Bogga internetka ee RKBU Vest waxa laga arki karaa foomka su'aalaha ee la isticmaalayo daraasadan. https://www.norceresearch.no/rkbu-vest-regionalt-kunnskapssenter-for-barn-og-unge/sporreundersokelsen.

Foomka su'aalaha ee fasallada 4-aad waxay ku jira su'aalo ka yar kuwa fasallada 5 – 10-aad.

Ka qaybgalku waa ikhtiyaar (qasab maaha)
Ilmahiina oo la tashanaya adiga/idinka oo ah waalidka/walidiinta/masuulka ayaa go'aansanaya inuu ka qaybgelayo daraasadda iyo in kale. Adiga/idinka oo ah waalidka/masuulka waxaad la soo xidhiidhi kartaan iskuulka haddii *aanad/aydaan rabin* in ilmahu ka qaybqaato daraasadda. Qasab maaha in la sheego sababta ilmahaagu uga qaybgalaynin daraasadda. Isla markaana waxa ilmahaaga u banaan inuu ka baxo daraasadda xataa kadib marka la bilaabo.

Ardayda aan ka qaybgelin daraasadda waxa caadi ahaan loo diri doonaa inay ka shaqeeyaan casharada iskuulka xilliga ay socoto daraasaddu, laakiin iskuullada ayaa go'aaminaya qaabka ugu wacan ee arrintaas loo nidaaminayo.

Ilaalinta macluumaadka ardayda – qaabkee u kaydinaynaa oo u isticmaalaynaa macluumaadka ka soo baxa daraasaddaa
RKBU Vest waxay macluumaadka laga soo ururiyo ardayda u isticmaali doontaa keliya ujeedooyinka aannu ku soo sheegnay qoraalkan. Waxannu macluumaadka u maarayn doonaa qaab sir ah oo waafaqsan xeerarka ilaalinta macluumaadka shakhsiyeed.

RKBU Vest waxay isticmaalaysaa Nettskjema (Jaamacadda Oslo) oo ah aaladda loo isticmaalo xog ururinta. Marka iskuulku dhammeeyo daraasadda waxa iskuulka lagu soo celinayaa warbixin kadib marka ay RKBU Vest hubsato in ardayna loo aqoonsan karin si toos ah.

Daraasaddu kuma saabsana in xogta laga helo iskuul gaar ah, laakiin waxay isticmaalaysaa natiijada wadarta ah ee ka soo baxdo iskuullo badan. Ma la shaacin doono tirooyinka ka soo baxa iskuulka. Isla markaana jawaabaha ardayga ma laga soo dhexsaari karo maqaallada daraasadda ama warbixinnada la soo saaro.

Maxaa lagu samayn doonaa macluumaadka la ururiyey?
Xogta lagu soo ururiyo daraasadaha sannadeed waxa lagu kaydinayaa seerferka amaanka ah ee *Tjenester for sikker datalagring* (TSD) oo Jaamacadda Oslo maamusho oo markaa NORCE AS heshiish la gashay. Seerferkani waxa ku dhisanyahay Nidaamka amaanka macluumaadka ee waaxda caafimaadka iyo daryeelka (Normen) oo markaas damaanad qaadaya amaanka macluumaadka marka la eego ilaalinta sir-qarinta, dhammaystirnaanta iyo helitaanka. Magaca iskuulka waxa lagu beddelayaa lambar marka uu ku jiro faylka xogta, waxaana la sameeyey fure isku-xidhe ah oo heer iskuul ah. Furaha waxa lagu kaydinayaa isla seerferkaas amaanka ah. Tiro yar oo ka mid ah shaqaalaha RKBU Vest ayaa geli karta seerferkaas amaanka ah, dhammaantoodna waxa saaran waajibaad sir-qarineed.

Xogta waxa lagu darayaa warbixinnada loo dirayo iskuullada si u qaadi karaan talaabooyin waafaqsan qaabka dhibaatada cayda isu beddesho. Marka la samaynayo daraasadaha cilmiyeed ee ka socda RKBU Vest waxa muhiim ah in la derso isbedddelka wakhtiga dheer ah ee ka jira iskuullada hirgeliyey barmaamijka Olweus, si wax looga sheegi karo faa'idada kasoo baxday barmaamijka ku saabsan cayda ka dhacda iskuullada.

Xuquuqda dadka ka qaybgalaya daraasadda
Xeerka ilaalinta macluumaadka ayaa ka qaybgalayaasha daraasadda siinaya dhowr xuquuqood (sida ku qoran qaybta 12-12). RKBU Vest waxa ku waajib ah inay ka qaybgalayaasha daraasadda u sheegto qaabka loo maaraynayo macluumaadka shakhsiyeed iyo inay u fududayso sidii ay isticmaali lahaayeen xuquuqdooda:

- in ay arkaan macluumaadka laga diiwaangeliyey ardayga
- in la saxo macluumaadka shakhsiyeed ee ku saabsan ardayga
- in la tirtiro macluumaadka shakhsiyeed ee ku saabsan ardayga
- in la siiyo koobiga macluumaadka shakhsiyeed ee ardayga
- in ilaaliyaha macluumaadka shakhsiyeed ama Hay'adda Ilaalinta Macluumaadka Shakhsiyeed loo diro cabasho ku saabsan maaraynta macluumaadka shakhsiyeed

Xuquuqdu waxay jirtaa markasta oo la maaraynayo macluumaad shakhsiyeed iyo marka ay suurtagal tahay in ardayda diiwaangashan loo garto si la hubo. Daraasadan ardayda *ma laga* diiwaangelin macluumaad si toos ah loogu aqoonsanayo sida magaca ama lambar aqoonsi. Waxa laga diiwaangelinayaa *keliya* macluumaadka guud sida magaca iskuulka, fasalka iyo jinsiga. Taas oo macnaheedu yahay in aanay badanaa suurtagal ahayn in la ogaado jawaabta uu bixiyey arday gaar ah. Laakiin mararka la arko in arday jawaabtiisa la garan karo waxannu ka caawin karnaa isticmaalka xuquuqaha kor lagu soo sheegay.

Yaa noo ogolaaday in aannu maarayno macluumaadka shakhsiyeed ee ilmahaaga?
Kadib markii ay ka soo codsatay NORCE AS ayey Nasjonal Samfunnsvitenskapelig Datatjeneste (NSD) garatay in maaraynta macluumaadka shakhsiyeed ee daraasadani waafaqsantahay xeerarka ilaalinta macluumaadka shakhsiyeed.

Ma rabtaa macluumaad kale?
Macluumaad kale waxaad kala soo xidhiidhi kartaa:

- Maamulaha daraasadda Anne Marita Milde oo ka tirsan RKBU Vest, NORCE Helse
  E-boos: anmi@norcereseach.no Tel 932 32 728
- La-taliye Sare Cecilie Marie Fjellbakk oo ka tirsan RKBU Vest, NORCE Helse
  E-boos: olweusprogrammet@norceresearch.no Tel. 56 10 72 23 .
- Norsk senter for forskningsdata AS
  E-boos: personverntjenester@nsd.no Tel. 55 58 21 17
- Ilaaliyaha macluumaadka shakhsiga ee NORCE AS
- E-boos: personvernombud@norceresearch.no

Salaan wacan

Ann Heidi Nebb
Maamule xarun/khabiir cilmi-nafsadeed

RKBU Vest
NORCE

Anne Marita Milde
Dr. psychol
Maamule daraasad/cilmi-baadhe
RKBU Vest
NORCE